



## Bilaabitaanka PPS-HD: Fariin ka socoto Guddoomiyaha Waxbarashada

### Gudji halkani si aad u aragto fariinta fiidiyowga ah ee Guddoomiyaha Waxbarashada Guerrero

Abriil 2, 2020

Qof kasta waan salaamayaa, waxaan idii rajeynayaa dhammaantiin inaad fiican tiihiin iyada oo caafimaadkiinuna wanaagsan yahay.

Waa aniga oo ah Guddoomiyaha Waxbarashada, Guadalupe Guerrero. Wuxaan rabaa inaad idii so diro fariin degdeg ardaydeena, qoysaska, iyo dhammaan shaqaalaha ma daalayaasha ah ee PPS si aan idii siiyo wararkii ugu dambeeyey ee ku saabsan wixii aan qabaneyn ilaa iyo intii Guddoomiyaha Gobolka Oregon ku dhawaaqay in dhammaan iskuulada Gobolka oo dhami la xiray.

Todobadadii ugu dambeeyey, qaranka iyo bulshooinkeenu waxa ay ka hortagayaan dhibaato caafimaad oo aynaan malaysan karayn. Wuxaan duco u diyarayaa dhamman intii uu haleelay xanuunkan caabuqa faafaya. Haddaba anaka macalimiin ahaan, waxa hakad ku yimid hawlihi maalinlaha noo ah ee aan qaban jirnay ee fasaladayadii, fasaladii jimicsiga jirka, hoolashii iskuulada iyo xitaa garoonadii ciyaaraha oo dhammaan cidla' ah, iyada oo sidaas loo yeelay sidii loo ilaalin lahaa caafimaadka ardaydeena. Inkastoo aynu guryaha ku hoos jirno oo iriduhu inoo xiran yihiin, haddana hamiladayadu ugu muhiimsan iyo mas'uuliyyada soo celisa deganaanshihi, daryeel iyo in dhammaan ardaydeenii waxbarashadii wadato iyada oo ay tahay arrin lama huraan ah si aan hore loo arag xitaa.

Ka hor inta aanan sii wadan hadalkeyga, waxaan jecelayahay in aan ardaydeena iyo qoysaska ku hadla luqada Isbaanishka inaan ku iraahdo farrinta degdega ah:

Hola estudiantes y padres de familia, espero que estén bien y en buena salud.

Soy su superintendente, Guadalupe Guerrero. Quería tomar un segundo para mandarles saludos y compartirles un acontecimiento de lo que hemos hecho desde que la gobernadora nos indicó que cerremos las puertas de nuestras escuelas.

Todas nuestras vidas han sido interrumpidas, y nuestros salones están vacíos. Pero aunque nuestras puertas físicas siguen cerradas, nuestra responsabilidad de traer estabilidad, cuidado y educación a nuestros estudiantes es más importante que nunca.

Gracias por confiar en nuestros maestros, directores y todo nuestro personal en este momento. Pueden encontrar información actualizada en Español visitando nuestra página de internet.

Dhammaan wararkeena cusub ee ku saabsan xanuunka coronavirus iyo xogtaba waxaa laga helayaa [shabakadayada](#) iyaga oo ku qoran dhowr luqadood.

Ugu horeyn, waxaan jecelahay inaan fariin gaar ah u diro ardaydeena: Waa idin xiiseen, Macalimiintii, la-taliyaashiinii iyo maamulayaashii iyaga oo si xoogan u shaqeynayaan runtii sidii ay u xaqiijin lahaayeen inaad wali waxbarashadiinii wadataan meel kasta oo aan waqtigani ku sugar tiiinba. Waxa aan ognahay in iskuulada bulshadeenu inay yihiin gurigeenii labaad, markaas maadaama aynaan kulmi Karin waqtigan xaadirka inaka oo is hor taagan, waxaan isku dayeynaa sida ugu fiican ee aad ugu xirnaan lahayd macalimiintiina iyo qaar fara badan oo ka mid ardayda fasaladiina sidii aan waxbarashadiina u sii wadan lahaydeen.

Saddex todobaad ka hor, iyada oo ay ahayd dareen qoto dheer degdegna ah kaasi oo xambaarsan daryeelka nabadjelyada ardaydeena, iyo shaqaalaha, waxa aan qaadanay tallaabada go'aanka lagu xirayey iskuulada iyo in aan dheereyno fasaxeenii xilliga gu'ga. Intaa wxii ka dambeeyey, Guddoomiyaha Gobolka Oregon waxa ay ku dhawaaqday xiritaanka iskuulada ilaa inta laga gaarayo bishan Abriil 28keeda, 2020.

Tallaabo degdeg ahaan, waxaan isgarab taagnay Xarunta Hawlgalada Hawlaha Degdega, taasi oo hormood ka ahayd sidii looga jawaabi lahaa baahiyahenna ugu mudan. Hoggaamiyaasha dugsiyada degmadu waxa ay sii wadeen iskaashigii maalinlaha ahay ee guddidii loo saaray in ay wax ka qabtaan dhammaan arrimaha iyo walaacyada soo baxaya inta lagu jiro dhibaatooyinkani, iyo sidii ay u xalin lahaayeen iyaga oo keenaya xal cusub, guryahana ka shaqeynaya sidi aan ula qabsan lahayn waciyagani aynaan hore u arag ee inagu cusub.

**Shaqaalaheena addeegyada cuntadu** waxa ay qabteen shaqo u baahan adkaysi iyaga oo taagnaa sidii ay uga qeybin lahaayen cuntada shan iyo tobantoo boobood oo ku yaala Portland, taasi oo ah sidii ay u xaqiijin lahaayeen arday kasta oo ka mid ah ardeydeenu oo u baahan cunto ama u xiisay iskuulkii inu sida dhib yar u helo cuntadii. Ilaa maanta, waxa aanu qeybinay **in ka badan 46,000 cunto ah**. Wuxaan u mahdcelinaya dadaalka shaqaalaha cuntada iyo shaqaalaha nafaafada iskuulada, waxa aan sii wadi doonaa qeybinta cuntada dhammaan magaaladeena maalin kasta, Isniinta ilaa Jimcaha, saacadaha 11:00 subaxnimo ilaa 1:00 duhurnimo. Wuxaad booqataan halkani [pps.net/coronavirus](https://pps.net/coronavirus) si aad u heshaan goobta idiinku dhow goobaha cuntada laga qeybinayo.

Waxaan si weyn ugu mahadcelinayaan **shaqaalaheena nadiifada** kuwaasi mashquul ku ahaa intii iskuuladu ay xiran yihiin sidii ay u gaari lahaayeen higsigoodii ahaa in la nadiifiyo mid kasta oo ka mid ah dhismayaasha iskuuladeena.

Haddii aanu nahay dugsiyada degmada, waxa aanu nahay hay'ad aad u ballaaran taasi oo sida runta ah bixisa heerar kale duwan oo agab ah waqtigani kuwaasi oo ay aad ugu baahan yihiin shaqaalaha daryeelka caafimaadka iyo kuwa safka hore kaga jira ee booliiska iyo dabdemiska. Dugsiyada Dadweynaha Degmadu(PPS) waxa ay soo ururiyeen **iyaga oo ku deeqay wax ka badan 2,400 N95 qalabka afka lagu daboolo**, sidoo kale waxa ay fudeydiyeen sidii alaabta PPE ugu deeqi lahaayeen PTA. Iyada oo la taageerayo qof kastaa sidii u fikiri lahaa una soo kordhin lahaa wax cusub, waxaa ogolaansho la siiyey labo ka mid ah macalimiinta Dugsiga Sarre ee Roosevelt sidii ay uga soo qaadan lahaayeen iskuulka daabacaada 3D sidii ay ugu sameyn lahaayeen gaashaanka wajiga kuwaasi oo ay isticmaalayaan shaqaalaha daryeelka caafimaadka ee safka hore.

Waxa sidoo kale aan furnay mid ka mid ah dugsiyadeena hoose iyada oo iskaashi la sameynay qolyaha bixiya **daryeelka xanuunta caruurta** sidaas awgeed caruruta ay dhalleen shaqaalaha

daryeelka caafimaadku sidi ay u heli lahaayeen daryeel inta ay waalidkoodu ku gudo jiraan shaqada geesinimada leh ee ay ku badbaadinayaan noolaha.

**Deeq bixiyaasha ganacsatada bulshadeena** sidoo kale waxa ay ka soo jawaabeen baaqayagii, iyaga oo og in badan oo ka mid ah qoysaskeena ah in noloshoodii ay burburtay. Anaka oo kaashaneyna hay'adaha macaash doonka ahayn ee dhaqaalaha ururiyo, **The Fund for PPS**, saaxiibadeena deeqsiyiinta ah Lyft si lacag la'aan ku qaadaya qoysaskeena u baahan inay takhtarka tegaan ama kuwa dukaanada cuntada ka soo iibsanaya.

Waxa kale oo aan ku faraxsanay inaan idin ogeysiyo markii ugu horeysay maanta in DoorDaash ay nala qaateen in aan iskaashano sidii loo maalgalin lahaa cuntada PPS ay iskuulada ka bixinayaan, kumbuyutarda iyo qalabka kale ee ay wax ku bartaan ardayda caafimaadku khatar gali karo ama ardayda kale ee aan laxaadka la' sidii ay u gaari lahaayeen goobaha cuntada lagu qaybiyo .

Ganacsatada maxaliga ahi sidoo kale waxa ay xiriir la sameynayaan sidii ay u taageeri lahaayeen qoysaskeena. Goobaha ganacsiga tusaale ahaan Pizzicato waxa ay si deeqsinimo leh ugu deequeen pizza qoysaska, iyo hudheelo aan badan oo aan la tiri Karin ayaa iyaguna waxa ay albaabadooda u fureen iyaga oo siinayey ardayda cunto bilaa lacag ah. Sidaa awgeed waan u mahad celinayaan iyagana

Maalgali PPS (The Fund for PPS) waxa ay sameeyeen sanduuqa maalgali coronaviruS (**coronavirus relief fund**), sidii ay jawaab degdeg ah uga bixin lahaayeen qoysaska u baahan kaalmo dhaqaale in lagu taageero waqtigani lagu gudo jiro dhibaataada. Fadlan waxaad kala socotaa email-ka Isgaarsiinta PPS wixii macluumaad dheeraad ah sida ay qoysasku ku heli karaan gargaarkan iyo addeegyada kale ee la heli karayo.

Haddii aad rabto inaad bixiso gargaar aad ku taageeryso ardaydeena iyo qoysaskooda waqtigani xaadirka ah, waxaad diri kartaa fariinta degdeg ah ereyga GIVE (G - I - V - E) ka dibna 844-334-1540. Sidoo kale waxaad booqan kartaa halkan [pps.net/coronavirus](http://pps.net/coronavirus) oo kugu xiri doona dadaalada lagu maalgalinayo gargaarka xanuunka Coronavirus.

Waxa aan aad u aaminsanahay **in la helo Internet** ay tahay xuquuq aasaasi ah. 25 sanno wax ka badan ka hor, waxa aan ahaa macalin da' yar oo bilaabay sida teknoolajigu u kobcin karo waxbarashada fasalka. Run ahaantii, ardayda iyo anigu waxaan aqoonsaneyn iyada oo fursad u helay in aan u soo bandhigo ka dib Madaxweyne Bill Clinton iyo Madaxweyne-xigeen Al Gore awooda iyo suurtagalnimada firkadani cusub ee (www) world wide web.

Sidaasi darted in la helo internet waa arrin aad muhiim ah waqtigani, Maalgali PPS, oo iskaashi la sameynaysa xafiiskayaga Teknoolajiga Macluumaadka waxa ay ka shaqeynayan sidii ay qoysaska caruurtoodu wax ka barato Dugsiyada Dadweynaha Portland ee u baahan u siin lahaayeen **wifi bilaash ah**.

Shaqaalahayaga Farsamada (IT) waxa ay sidoo kale ku hawlan yihiin sidii u diyaarin lahayeen arday kasta oo u baahan **kumbuyuutar** uu guriga ku haysto inuu mid helo. Qeybinta kumbuyuutaradaasi waxaa la bilaabay Tallaadadan, iyada oo ilaa iminka aan qaybinay 2000 oo kumbuyuutarada yaryar ah isla markaasna aan rajeyneyno in aan qeybino wax ka badan dhowr kun.

Intii aan akhriyayey emailo fara badan, wixii baraha bulshada lagu soo bandhigay iyo golayaasha waalidiinta ee online ka ah, waxa aan maqlay sida aad u walaacsan tiiin sidii aad u siin lahayn deganaansho ardaydiina una bilaabi lahaydeen jadwal joogta oo ay wax ku bartaan sidii caadiga ahayd. Fadlan waxaad ogaataa in kooxdayada Waxbarista iyo Waxbarashadu iyaga oo iskaashanaya shaqaalahayaga muruqmaalka ah, in ay ka shaqeynayaan habeen iyo maalin sidii ay u sameyn lahaayeen waxbarasho ku salaysan sidii ay ardaydu guriga ugu qaadan lahayd, waxa aanu tixraaceynaa iyada oo loo soo gaabiyey **PPS-HD**. Waxa aynu dareemayno jiilkeenii waqtigii Apollo 13, sida aan dib u milicsaneyno qaabkani waxbarashada ee fasalka gudhiisa ilaa waxbarashado muuqaalka fog, taasi oo sidii ay ugu xirnaan lahaayeen ardaydeenu iyaga qabanaya shaqada ugu fiican inay dhiirigalinaya sii wadista fursadii ay wax kaga baran lahaayeen macalimiintena. Waxa aan ku weydiisaneynaa inaad dulqaad noo muujisaan waqtigan kala guurka ah ee waxbarashadii fasalka lagu qaadanayey laga guurayo ee loo guurayo in ay ardaydu wax ku barato online.

Intii aan ka soo noqonay Fasaxii Gu'ga, macalimiintena iyo maamulayaashu waxa ay mashquul ku yihiin sidii ay u baran lahaayeen Teknoolaji waxbarashada ee kala gedisan iyo istaraajiyadu kale oo ardayda iyaga oo aan kula joogin fasal wax loo bari lahaa. Fadlan waxaad ogaataan macalimiintu waxa ay bilaabi doonaan in idinla soo xiriiraan sidii ay ardayda wax u bari lahaayeen Isniinta soo socota ee Abriil 6deeda.

Waxaan rabaa inaan mahadnaq gaar ah u diro hoggaamiyaasha iskuulka iyo macalimiintena madaalayaasha ah. Waxa aynu ku jirnaa waqtii aan hore inoo soo marin, haddana anigo oo aan waxba dib u dhiganeyn waxa aan ogahanay in aad caawineysaan ardaydeena dhinacyo badan. Waad mahadsan tiiin. Wax aad ardaydeena, qoysaskeena iyo bulshadeenaba u muujineysaa sida ugu sifowdeen adkeysiga, la qabsiga iyo naxariista, daryeelka iyo inaad u furan tiiin in aad isbedel sameysaan taasi oo ah Dabeeecada Lagama Maarmaanka ah ee Macalimiinta Degmadeena..

Waxa aynu ognahay waqtigani kala guurka iyo dadaalku in aanu noqoneyn mid noqda sidii la rabay. Xaqiqda jirtaa waa in ay jiraan caqabado waaweyn oo u baahan in lala legdamo sidii loo bedeli lahaa habka loo gaarsiinayo ee ugu degdega badan habeenkaagaba. Nagala soco PPS-HD wixii macluumaad dheeraad a, habka waxbarashada guriga ee ardaydu wax ku baranayaan ku salaysan iyaga oo aan iskuulka joogin.

Sida idinku oo kale, marnaba ma fileyn in aynu xaalandanu galayno. Waxaan aad u hanweynahay **dadaalka wadareedka kooxda** ay qabanayaan macalimiinta, la taliyaasha, maamulayaasha, shaqaalaha cuntada, shaqaalaha xafiiska xarunta dhexe iyo hoggaanka sarre ee dugsiyada. Inaga oo wada jirna, waxa aan tooshka u sidanaa xaqiijo cusub ee waxbarashada dadweynaha Portland.

Waxa aynu ogsoonahay inay **jiraan wali su'aalo fara badan**. Maxay u tahay xiritaanka iskuulka ee la dheereyey ardaydii ku jirtay fasalka 12naad? Maxay u tahay dhibcihi ardayda fasalka 12naad ku jirtay? Maxay noqoneysaa fasalada iyo sida loo qiimeynayo waxbarashada ardayga? Waan ku dhageysaneynaa iyada oo aan jecelnahay in na sugto si degenaansho leh inta aan ka heleyno tusaalooyin iyo tilmaamo Waaxda Waxbarashada Oreogn. Wixii jawaabo ah su'aalihiina waan idinla wadaagi doonaa sida ugu dhakhso badan ee aan uga helno madaxda Gobolka.

In ka yar 10 maalmood oo maalmaha iskuulka, macalimiintenu waxa aynu la leenahay xiriir muhiim, kooxdeena barashada iyo baristu waxa ay sameynayaa tilmaamo ay siinayaa inay

raacaan ardayda guryaha wax ku baraneysa. Tani waa tijaabada ugu weyn taariikhda waxbarashada dadweynaha sida uu dhan yahay wadankani Maraykan. Waxa aynu ogsoonahay in uu leeyahay habkani dhbaatadiisa dhinaca sinaanta iyo in loo siman yahay. Macalimiinta PPS waxa ay intii kartidooda iyo aqoontooda ah iku dadaali inay caqabadahaasi ka ilaaliyan oo ardayda gaadhsiin waxbarashada

Marka uu PPS-HD uu yimaado online, si joogta ayaanu wada xiriiri doonaa degmada, gobolka iyo hoggaamiyaasha qaranka, wax sidoo kale aan sii wadi doonaa in aan u doodno ardaydeena iyo iskuuladaba.

Nasiib daro, waxa aynu ognahay dhibaatooyinka caafimaad sidoo kale inuu raad ku yeelanayo dhaqaalihii Oregon iyo waxbarashada dadweynaha K-12. Wuxuu aana rajeyneynaa saadaalinta dhaqaalaha ee PPS, iyo dugsiyada degmada ee Oregon uma muuqdaan kuwa fiican. Anaka oo iskaashi dhow la sameynayna Golaha Waxbarashada waxa aanaan sii wadi doonaan in ay u doodaan sidii loo maalgalin lahaa dugsiyada dadweynaha, iyo in aan kala shaqeyno in la meelmariyo miisaaniyad isku dheelitiran sanadka soo socda- inkastoo ay jiri doonaa in aana sameyno go'aano adag oo aanaa qaadan doono marka aan ogaano raadka uu ku yeelanayo dhaqaale ahaan iskuuladeena dhibaataadani. Fadlan waxaad ogaataan waxa aanaan si degdeg ah u qaadnay tallaabooyin isku duweynaa inaan yaraneyo kharashyada iskuuladeena sidii loo ilaalin lahaa dhaqaalaha dadweynaha. Mowduucyo badan oo ku saabsan arrintani ayeynuka wada hadli doonaa mar dambe.

Waxaa jira dhowr arrin oo dhibaataadani ay ii bayaamisay aniga:

Waqtiga lagu jiro dhibaataada iyo quusta, bulshadeenu midba midka kale ayey taageeraan. Shaqaalaheena caafimaadka ee safka hore waxay inoo bixinayaan nafahooda sidii ay u daryeeli lahaayeen dadka kale ee u baahan daryeelka. Macalimiinteen waxa ay si weyn uga shaqeynayaan sidii ay u sii wadi lahaayeen in ardaydeenu waxbarashadoodii iyaga oo ku sugan guryahooda.

Haddii aad caawimo u fidineyso qoysaska, ardaydeena ka kooban 50,000 arday siineyso cunto, ama xitaa haddii aad guriga joogeysa sidii aad uga hortagi lahayd fiditaanka cudurka, adiguna sidoo kale waxa aad qabaneysaa qeybtadii sidii looga guuleysan lahaa dhibaataadani

Waynu garanay tani. Waxa aana ogsoonahay in aan ka bixi doono inaga oo wada jirna. Caafimaad baan idii rajeynaya. Waad mahadsan tiihiin.

Guadalupe Guerrero  
Guddoomiyaha Waxbarashada